

# Xuquuqaha Shaqaalaha Inta Lagu jiro Ololaha Abaabulka Ururka

Sida uu dhigayo Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka, shaqaalaha, *maaha shaqo bixiyaha*, waxay xaq u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan inay rabaan urur shaqaale inuu matalo iyo in kale. Iyadoo laga warcelinayo abaabulka ururka, shaqo bixiyaha awood uma laha inuu:



Eryo, hoos u dhigo, badalo shaqaale si ay u muujiyaan ra'yiga ururka mise ku abaalmariyo shaqaalaha inay muujiyaan aragtiyaha ka soo horjeedda ururka.



Yareeyo mushaharka, saacadaha, mise dheefaha.



Ka yeelo shaqada mid aad u adag mise mid aan la jeclayn—sida badalka jadwalka shaqada, diidista saacadaha dheeraadka ah, mise kala soocidda shaqaalaha.



Sandulle kaga dhigo shuruudaha waraaqaha cusub si aad u ilaaliso shaqada.



U sheego shaqaalaha in aysan macno ku fadhin in ay doortaan urur shaqaale.



La xiriir sharci fulinta, oo ay ku jirto ICE.

Shaqo bixiyaha sidoo kale ma shaqaaleysiin karo qolo saddexaad inay sameeyaan mise sheegaan waxyaalaha ay mamnuucday inay sameeyaan oo sheegaan. Dhinacyada saddexaad ee ay shaqaaleeyeen shaqo bixiyeyaasha loo-shaqeeyayaashu sidoo kale iskuma sheegi karaan inay yihiin wakiillo dowladeed mise wakiillo NLRB.



Haddii shaqa bixiye faragalin ku sameeyo xuquuqdaada inaad samayso, ku biirto, mise caawiso urur, dacwad shaqo oo aan cadaalad ahayn ayaad NLRB ka xaraysan kartaa. Waxaan haynaa turjubaanno diyaar ah.

Kahel xafiiska maxalliga ah ee NLRP: [bit.ly/NLRBOffices](https://bit.ly/NLRBOffices)

Naga soo wac: 1-844-762-6572

limayl nooga soo dir: [publicinfo@nlrb.gov](mailto:publicinfo@nlrb.gov)

Dacwad ka xaree: [bit.ly/FileACharge](https://bit.ly/FileACharge)

Macluumaad dheeraad ah [nlrb.gov](https://nlrb.gov)